# Falanqeynta warbixinta shakhsi ahaaneed

Waxaa adiga laguu soo bandhigay ama laguu qaatay nidaamka caawinta ee dhibbanayaasha soo maray ka ganacsiga dadka (nidaamka caawinta ee dambe). Macmiil ahaan waxaad xaq u leedahay caawimaad sharci ahaaneed, taasoo ka qayb ah waxqabadyada caawimaadda loogu talaggalay dadka soo maray ka ganacsiga dadka. Waxaa intaas dheer oo aad heli kartaa talosiin la xiriirta howlaha nidaamka caawinta. Baahidaada caawimaad waxaa loo qiimaynayaa si gaar ah, waxqabadyada caawimaaddana waxaa loo qabanqaabinayaa sida uu dhigaayo sharciyada xilligaan shaqaynaaya, iyadoo lagu salaynaayo qiimeynta baahidaada gaarka ah.

Haddii aad Finland ku joogto magangalyoddoon qaxootinnimo, waxaad sidoo kale heli kartaa adeegyada xerada qaxootiga ee loogu talaggalay dadka magangalyoddoonka qaxootinnimo. Haddii aad doonayso waxaad faahfaahinta dheeraadka ah ee ku saabsan falanqaynta warbixinta shakhsi ahaaneed ee howlaha xerada qaxootiga weydiin kartaa xeradaada qaxootiga ee aad ka tirsan tahay. Haddii aad Finland degaan ku leedahay, degmada aad deggan tahay ayaa ka mas'uul ah qabanqaabnita nidaamka caawinta dhibanaha soo maray ka ganacsiga dadka ee adiga laguugu talaggalay. Haddii aad u baahato waxaad warbixinta dheeraadka ah ee ku saabsan adeegyada falanqaynta warbixinaha shakhsi ahaaneed ee daryeelka arrimaha bulshada iyo daryeelka caafimaadka, aad weydiin kartaa degmada aad deggan tahay.

Falanqeynta warbixinaha shakhsiyadeed ee nidaamka caawinta waa qaab waafaqsan nidaamka ilaalinta guud ee warbixinaha ee ururka midowga yurub iyo sharciyada caalamiga ah ee arrinkaas laga dejiyay.

Nidaamka caawinta waxaa uu ugu horraynta ka helaa warbixintaada shakhsi ahaaneed adiga nafsad ahaantaada ama hawlwadeennada dowladda ee adiga kuu soo gudbiyay inaad macmiil ka noqoto nidaamka caawinta, ama waxyaabaha kale ee qoraal ahaanta ah ee loo soo gudbiyay nidaamka caawinta. Warbixintaada waxaa lagu kabi doonaa qaybaha dambe ee arrimaha macmiilnimadaada. Falanqaynta warbixintaada waa mid marwalba la xiriirta howlaha sharci ahaanta loo dejiyay ee nidaamka caawinta, waxaana marwalba warbixintaada loo falanqeynayaa qaab ku salaysan kalsooni iyo aaminaad, iyadoo loo isticmaalaayo ujeedada loo keydiyay oo kaliya. Warbixintaada shakhsiga waxaa cid kale loo gudbin karaa markii adiga lagaa helo oggolaansho oo kaliya, ama iyadoo lagu salaynaayo sharciga laga dejiyay arrinkaas ee shaqaynaaya, marka laga hadlaayo arrinka ah xuquuqda wargelin gudbinta.

*Sharciga ku saabsan badbaadada caalamiga ah ee dadka soo codsaday qaxootinnimada iyo aqoonsiga dhibanaha soo maray ka ganacsiga dadka iyo caawintiisa

IHMISKAUPAN UHRIEN
AUTTAMISJÄRJESTELMÄ

WWW.IHMISKAUPPA.FI

# Falanqaynta warbixinta shakhsiyadeed ee diiwaangelinta iyo nidaamka kombiyuutarka

**Nidaamka falanqaynta arrinka dadka ajnabiga ah ee dhibbanayaasha dadka soo maray ka ganacsiga dadka ee howlaha nidaamka caawinta**

Nidaamka caawinta waxaa uu howlihiisa u isticmaalaa nidaamka falanqaynta arrimaha dadka ajnabiga ah. Nidaamka falanqaynta arrimaha waxaa lagu diiwaangeliyaa dhammaanba dadka soo maray dhibbanaha ka ganacsiga dadka, iyo dadka loo soo bandhigay in ay ka mid noqdaan nidaamka caawinta. Nidaamka falanqaynta arrinka waxaa lagu falanqeynayaa arrimaha khuseeya warbixintaada ee ah in laguu qaato ka macmil ahaan iyo Aqoonsiga ka dhibbane ahaan soo maray ka ganacsiga dadka iyo gaarista go'aanka ku saabsan joojinta macmiilnimada, suuraggalnimada ah gaarista go'aanka ku saabsan xilliga ka fiirsashada, qabanqaabinta hawlaha caawimaadda, qorshayntooda, hireglintooda, la socodkooda iyo ilaalinta tayada shaqada, sidoo kale caddaynta howlwadeenka ka shaqaynaaya arrimaha nidaamka caawinta. Warbixintaada waxaa kaloo loo falanqaynayaa qorshaynta dhibbanaha soo maray ka ganacsiga dadka ee nidaamka caawinta, hirgelinteeda, diiwaangelinta istaatiisikada, la socodkiisa iyo ilaalintiisa.

Falanqaynta warbixinta waxaa ay u dhici kartaa qaab elegtoroonig ah ama qaab gacan ahaan lagu qabto oo waraaqo ku qoran. Xaaladaha ay suurtaggalka tahay in ay dhacdo khatar, dhibaato ama xaalad aan caadi ahayn iyo howlaha waxqabadka ah ee intaa ka dambeeya, waxaa warbixintaada shakhsiyadeed loo falanqeynayaa ujeedada loogu talaggalay ee diiwaangelinta arrinkaas (waxaa arrinkaan uu khuseeyaa oo kaliya macaamiisha nidaamka caawinta ee deggan xerada qaxootiga).

- Ilaalinta warbixin tebinta diwaangelinta nidaamka caawinta waxaa laga helayaa bogga internetka ee ah: ihmiskauppa.fi.
- Arrimaha ku saabsan diiwaangelinta bukaanka xerada qaxootiga waxaad u diri kartaa weydiinta su'aashaas iimeylkan: ihmiskauppa.auttamisjarjestelma@migri.fi.

**Diiwaangelinta bukaanka ee xerada qaxootiga**

Waxaa adiga laguugu diiwaangelinayaa diiwanka bukaanka ee xerada qaxootiga, hadii aad hesho adeegyada daryeelka caafimaadka ee dhibbanaha soo maray ka ganacsiga dadka ee nidaamka caawinta (ma khuseeyso macaamiisha degaanka ku leh Finland). Diiwaangelinta bukaanka waxaa lagu falanqeynayaa warxbintaada bukaan ahaan ee kuu gaarka ah, iyadoo la samaynaayo baritaanka hore ee caafimaadka iyo waxyaabaha kale ee daryeelka caafimaad ee la xiriira hawlaha daryeelka caafimaadka, waxaana samaynaaya hawlahaasi shaqalaha ka tirsan nidaamka caawinta ee dhibbanaha soo maray ka ganacsiga dadka ee ah xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ama waaxda daryeelka ee nidaamka caawintu uu soo iibsado. Warbixintaada waxaa kaloo loo falanqaynayaa qorshaynta adeegyada daryeelka caafimaadka, hirgelinteeda, diiwaangelinta istaatiisikada, la socodkiisa iyo ilaalintiisa.

- Ilaalinta warbixin tebinta diiwaanka bukaanka waxaa laga helayaa bogga internetka ee ah: www.migri.fi.
- Arrimaha ku saabsan diiwaangelinta bukaanka ee dhibbanaha soo maray ka ganacsiga dadka ee nidaamka caawinta, waxaad u diri kartaa weydiinta su'aashaas iimeylkan: ihmiskauppa.auttamisjarjestelma@migri.fi.

**Khatarta nidaamka maaraynta diiwaangelinta ee Granite**

Nidaamka maareynta khatarta ee Grantie waxaa xerada qaxootiga looga isticmaalaa, ka warbixinta xaaladaha dhacay ee la xiriira khatarta, dhibaatada ama xaalad hanjabaad ah, iyo sidoo kale qorista howlaha ka dhalanaaya arrimahaas. Xaaladaha hanjabaadda, khatarta ama dhibaatada ah waa dhacdooyinka ku leh ama ay dhici karto in ay saameyn ku yeeshaan shaqaalaha, macaamiisha iyo ammaanka degaanka ee xerada qaxootiga.

- Ilaalinta warbixin tebinta ee diiwaangelinta macmiilka waqtiga qaabilaadda waxaa laga helayaa bogga internetka ee ah: www.migri.fi/tietosuoja

- Arrimaha ku saabsan nidaamka maareynta khatarta diiwaangelinta ee falanqeynta macluumaadka shakhsi ahaaneed ee dhibbanaha soo maray ka ganacsiga dadka, waxaad u diri kartaa weydiinta su'aashaas iimeylkan ah ihmiskauppa.auttamisjarjestelma@migri.fi

**Diiwaangelinta kaarka lacag bixinta**

Nidaamka caawinta ee dhibbanaha soo maray ka ganacsiga dadka, waxaa uu ku siinayaa kaarka lacag bixinta, hadii aad qaadato lacagta biilka xerada iyo haddii uu nidaamka caawintu ka mas'uul yahay joojinta biilka xerada qaxootiga iyo siinta lacagta lagu siinaayo adiga. Diiwaangelinta kaarka lacag bixinta waxaa loo isticmaalaa arrimaha la xiriira, qorsheynta, hirgelinta iyo ilaalinta kaarka lacag bixinta. Warbixinta gaarka ah oo ku saabsan kaarka lacag bixinta ayaa laguugu sheegi doonaa warbxinaha muhiimka ah ee ku saabsan kaarka lacag bixinta.

- Ilaalinta warbixin tebinta ee kaarka lacag bixinta waxaa laga helayaa bogga internetka ee ah: www.migri.fi/tietosuoja
- Arrimaha ku saabsan falanqeynta macluumaadka shakhsi ahaaneed ee kaarka lacag bixinta ee dhibbanaha soo maray ka ganacsiga dadka ee nidaamka caawinta, waxaad u diri kartaa weydiinta su'aashaas iimeylkan vokki@vok.fi

## Xuquuqda uu qofku u leeyahay in uu galo macluumaadkiisa

Macluumaadka la diiwaangeliyay haddii la codsado waa la ariki karaa macluumaadkaas shakhsi ahaaneed ee la diiwaangeliyay ama warbixinta la falanqeeyay iyo kuwa aan wali la falanqeynba. Waxaana codsiga warbixintaa loogu gudbin karaa diiwaan hayaha sida soo socota:

- In codsiga warbxinta loogu diro qoraal ahaan cinwaanka ku qoran tebinta ilaalinta macluumaadka ee diiwaan hayaha
- In qofku uu si shakhsi ah u tago xerada qaxootiga ee heysa diiwaanka macluumaadkiisa

Waxaa jira xaalado gaar ah oo la diidi karo xuquuqda hubinta macluumaadka. Marka diiwaan hayaha uu diido bixinta macluumaadka, waxaa qofka la siinayaa waraaq caddeyn ah oo diidmadaas ku saabsan. Waraaqdaas caddeynta ah waxaa lagu sheegayaa sababaha keenay in codsigaaga macluumaad hubinta ah la diido.

Diiwaan hayaha wuxuu kugu soo dallacan karaa magdhow macquul ah oo ku saabsan kharashkii ku baxay isticmaalka ama codsiga hubinta macluumaadka, haddii codsigii kan ka horreeyay ee xuquuqda hubinta macluumaadka ay ka soo wareegtay wax ka yar hal sano.

## Xuquuqda qofka ee sixista ama dhammaystirka macluumaadka

Qofku wuxuu xaq u leeyahay in macluumaadkiisa la diiwaangeliyay uu ka dalbado diiwaan hayaha in uu saxo, ka saaro ama dhammaystiro macluumaadkaas diiwaan gashan, wixii la falanqeeyay ee khaladku ku jiro, ama aan loo baahneyn, kala dhiman amaba ah macluumaad hore oo gaboobay ama duq ah oo aan la socon heerka cusub ee arrinku maraayo. Xaaladdaan oo kale waxaan kaa codsaneynaa adiga inaad sheegto warbixinta khaladka ah, islamarkaana aad sababeyso khaladka jira iyo waxa aad dooneyso in wax laga beddelo, ama aad noo sheegto warbixinta aad dooneyso in la dhammaystiro iyo qaabka loo dhammaystiraayaba.

Codsiga ku saabsan ka saarista macluumaadka, sixitaankooda iyo dhammaystirkoodaba, waxaa loogu gudbin karaa diiwaan hayaha si shakhsi ahaaneed oo ah qaabkan soo socda:

- In codsiga warbxinta loogu diro qoraal ahaan cinwaanka ku qoran tebinta ilaalinta macluumaadka ee diiwaan hayaha
- Danodhamaysiga shakhsiahaaneed ee lala yeelanaayo wakiilka shaqaalaha dhibbanaha soo maray ka ganacsiga dadka ee nidaamka caawinta

## Ogeysiinta ku saabsan falanqeynta macluumaadka shakhsi ahaaned iyo xaqa uu qofku u leeyahay in uu racfaan u gudbiyo hawlwadeennada dowladda

Haddii aad dooneyso in aad soo sheegto ama wargeliso dhibaatada ku saabsan falanqeynta macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed, waxaad marka hore la xiriirtaa wakiilka diiwaan hayaha ama mas'uulka ilaalinta macluumaadka ee Waaxda Socdaalka. Waxaad xaq u leedahay in aad racfaanka ku saabsan falanqeynta macluumaadkaaga u gudbiso hawlwadeennada dowladda ee qaabilsan ilaalinta arrinkaas. Waxaana dalkaan Finland hawlahaas ilaalinta macluumaadka u qaabilsan xafiiska wakiilka ilaalinta macluumaadka (www.tietosuoja.fi).

## Tebinta ilaalinta macluumaadka ee waqtiga la socda waxaa laga helayaa bogga internetka ee waaxda Socdaalka www.migri.fi iyo bogga Ihmiskauppa.fi